

# KULA HADAL ILMAHAAGA LUQADA AAD SI FIICAN U TAQAAN

Waxaad tahay ilmahaaga barihiisa ugu muhiimsan carruurtuna waxay u baahan tahay inay ku hadlaan, akhriyaan oo qoraan luqada ay ku hadlaan waalidkood iyo daryeellahooda ugu muhiimsan. Maaha keliya inay muhiim u tahay aqoonsigooda iyo lahaanshahooda, waxay ka caawimaysaa inay ku guulaystaan waxbarashada dugsiga.

Bilaabida inay bartaan Ingiriiska luqadooda kowaad ka dib waxay qaadan kartaa waqtii, laakiin carruurtaadu ku khasarimayaan haddii aanay guriga kaga hadlin Ingiriis.

## **Kula hadal, la akhri oo la qor ilmahaaga luqada aad si fiican u taqaan – luqada gurigaaga.**

Waxaa waajiba inaad kula hadasho, la akhrido oo la qorto inta ugu badan luqada gurigaaga, iyo xaalladaha kala duwan, kuwaas oo ay ka mid yihiin:

- La heesida, la sheekaysiga, la cayaarida gaymamka ilmahaaga iyo wax ugu akhrinta ilmahaaga luqadaada;
- Kula hadlida afkaaga ilmaha marka qoysku dibada u baxo iyo munaasabada;
- Kula hadlida ilmahaaga afka guriga lagaga hadlo xataa haddii ilmahaagu ku jawaabo Ingiriis. Carruurtu waxay maqli karaan faraqyada u dhixeeeya luqadaha;
- Mudo ka dibna, waxaa waajiba inaad ka caawinto shaqada guriga lagu qabanayo adoo awaamiirta ku bixinaya luqadaada, sababtoo ah xirfad kasta oo ay yeeshaan waxaa weli lagu isticmaali karaa dugsiga. Tusaale ahaan, haddii aad barto ilmahaaga sida loo xoojiyo luqadaada, dabeeci ahaan waxay fahmayaan sida Ingiriiska loogu isticmaalo sidaas oo kale.

## **Hayso luqadaada; xooji mustaqbilka ilmahaaga**

Kula hadalka, la akhrinta iyo wax kula qorida ilmahaaga luqada guriga lagaga hadlo, waxaad ka caawimaysaa inay noqdaan kuwa ku hadla laba luqadood taas oo leh faaidooyin badan. Carruurtu labada luqadood ama luqadaha badan ku hadla degdeg ayay uga hor-maraan carruurtu ku hadasha hal luqo keliya.

**Cilmi-baaris ayaa muujisay in barashada laba luqadood ama ka badan oo dadka da'da yaryar ay:**

**Dhaqaajiso koritaanka maskaxda;** ku hadalka wax ka badan hal luqo waxay kor u qaadaa kororka maskaxda carruurta. Waxay ka caawintaa inay u fekeraan si hal abuur leh waxayna wax u xaliyan si sahlan.

**Waxay xoojisaa xirfadaha barashada Ingiriiska;** ku hormarinta farbarashada gurigooda iyada oo la baranayo Ingiriis waxay ka caawintaa carruurta inay bartaan sida luqaduhu u shaqeeyaan waxayna u hogamisaa inay noqdaan akhriyayaal, dhegaystayaal iyo hadalyaano wanaagsan.

**Waxay wanaajisaa feejignaanta iyo xirfadaha tirabarashada;** ku hadlida laba luqadood ama ka badan waxay xoojisaa “muruqyada maskaxda”, iyada oo wanaajinaysa xusuustooda iyo awoodooda feejignaanta.

**Waxay wanaajisaa wax-qabadka guud ee dugsiga;** Carrurta ku fiican labada luqaba Ingiriiska iyo tan guriga lagaga hadlo waxay badanaa ku fiicnaadaan imtixaanada la mustaweeey marka loo fiiryo carruurta ku hadasha hal luqo ama hal af, khaasatan Xisaabaadka, akhrinta iyo erayada.

**Xoojinta dareenka aqoonsiga;** Carrurta wax ku baratay luqada guriga lagaga hadlo way u sahlanataa inay xiriir fiican la yeeshaan qoyskooda, bulshadooda iyo dhaqanka noloshooda oo dhan. Mustaqbilka, ilmahaaga labada luqadood ku hadla wuxuu leeyahay fursada inuu shaqo hello wuxuuna haystaa fursada badan oo uu ugu safro kana shaqeeyo dibada. Xukuumada Fiktooriya waxay soo noolaynaysaa waxbarashada luqadaha, sidaas darteed ilmahaagu wuxuu bilaabayaa barashada luqada kale oo dugsiga laga barto.

**Si kasta ha ahaatee, waa muhiim inaad kula hadasho la akhrido waxna kula qorto ilmahaaga gurigaaga. Waxay ilmahaaga u hogaminyasa inuu ku fiicnaado laba luqadood, diyaarna u ahaado hanashada fursadaha adduunka oo ay taasi u keenayso.**